

Tallaal maanta. Ilaali berrito.

Carruurta caafimaadkooda ku ilaali tallaalada iyo tallaalada xoojinta ah ee ay u baahan yihiin. Medicaid iyo CHIP waxay bixiyaan caymis caafimaad oo lacag la'aan ah ama qiime jaban oo loogu tala galay carruurta iyo dhallinyarada illaa 19 jirka ah. Caruurta waxay heli karaan baaritaanno joogto ah, tallaal, dhakhtar iyo booqashooyinka ilkaha, daryeelka isbitaal, adeegyada caafimaadka dhimirka, daawooyinka dhakhtar soo qoro iyo in kale oo badan. Diiwaangelintu way furan tahay inta sanadka lagu jiro oo idil. Waxaa laga yaabaa inaad hadda u qalanto, xitaa haddii aad hore u codsatay. Qoysaska afar qof ka kooban ee dakhligoodu gaarayo ku dhawaad \$80,000* ayaa u qalmi kara.

Booqo [InsureKidsNow.gov](https://www.insurekidsnow.gov) ama wac **1-877-KIDS-NOW (543-7669)** si aad wax uga sii ogaato caymiska caafimaad ee la awoodi karo ee qoyskaaga.



[InsureKidsNow.gov](https://www.insurekidsnow.gov)

